dhibicda lagu siin doono.

Hadii aad dhawaan codsatay koontoyin cusub oo badan laga yaabaa in uu waxyeelo dhibcaha deyn-qaadashada aad leedahay.

Taariikh kooban oo deyn-qaadasha ah waxbay yeelaysaa dhibcaha deyn-qaadashada aad leedahay, laakiin tariikh kooban waxaa caawin kara wax yaaba kale, oo ay ka mid tahay biilka oo wakhtigiisa aad bix iso iyo lacagta lagugu leeyahay oo tiradeedu badnayn. Eeg warbixinta deyn-qaadashadaada si aad u hubiso in ay sax tahay oo ay khalad ku jirin.

WARBIXINTA DEYN-QAADASHADA

Warbixinta deyn-qaadashadaada waxaa ku jira macluumaad ku saabsan dhibcaha deyn-qaadashadaa taas oo qayb wayn ka qaadanaysa deynta ogolaashadeeda — iyo inta lacag aad bixin doonto si aad deyn u qaadato.

Waxaad u baahantahay warqad warbixin oo ku saabsan deyn-qaadashadaada si aad u hubiso in ay macluumaadka ku qorani ay saxtahay, ay dhantahay ayna wakhtiga la socoto, khaasatan intaanad codsan deyn wayn ama inta aanad shaqo codsan. Warbixinta deyn-qaadashadaadu waxa kale oo ay kaa ilaalinaysaa in aqoonsigaaga lagaa xado.

Aqoonsi xadidu waa marka uu qof isticmaalo macluumaadkaaga.

Sharciga dawlada sare wax ay faraysaa sadexda shirkadood ee wadanka in ay bilaash kuu siiyaan warbixinta deyn-qaadashadaada laba iyo tobankii biloodba mar.

Hadii aad dalbanaysid, waxaad booqataa annualcreditreport.com, wac 1-877-322-8228, ama waxaad buuxisaa warqada warbixinta deyn-qaadashada waxaanad u dirtaa: Annual Credit Report Request Service, P.O. Box 105281, Atlanta, GA 30348-5281.

Waxaa jirtaa meel kali ah ood u doonan kartid warbixin deyn-qaadasho rasmi ah; **annualcreditreport.com**. Ka fogow meelaha kale ee beenta sheegi karta.

SAACADAHA

FARGO PUBLIC LIBRARY

102 3rd St. N. • Fargo
(701) 241.1472

Isniinta-Khamiista 9-9
Jimcaha 11-6
Sabtida 9-6
Axada 1-6*

**Maktabadu ugu wayni way xirantahay axadii laga bilaabo maalinta xasuusta ilaa iyo maalinta shaqaalaha .*

DR. JAMES CARLSON LIBRARY

2801 32nd Ave. S. • Fargo
(701) 476.4040

Isniinta-Khamiista 10-8
Jimcaha 11-6
Sabtida 9-6*
Axada 1-6

Maktabada Dr.James Carlson way xirantahay Axadii laga bilaabo maalinta Xasuusta ilaa maalinta Shaqada.

NORTHPORT BRANCH

2714 N. Broadway • Fargo
(701) 476.4026

Isniinta-Khamiista 10-8
Jimcaha 11-6
Sabtida 9-6
Axada ..... Xirantahay

WWW.FARGOLIBRARY.ORG

Fargo Public Library

XIRFAD LACAG

Ku bilow Xirfad: Gundhiga Deyn-Qaadashada

FINRA Investor Education Foundation · smartinvesting @your library · ALA American Library Association

5.2010

DEYN-QAADASHO: GUNDHIGA

WAA MAXAY DEYN-QAADASHADU?

Deyn-qaadashadu waa aaminka maaliyadeed oo aad adigu leedahay. Deyn-qaadashadaadu hadii ay fiicantahay mecnahu waa taariikhda biil bixintaada, shaqadaada iyo mushaarkaaga waxa ay si fiican kuugu sharaxayaan si aad deyn u heshid. Deynleyaasha(waa kuwa deynta bixiya ama khidmadaha) waxay rabi doonaan in ay wax kula qabtaan. Marka aad leedahay deyn-qaadasho wanaagsan badanaa mecnaheedu waxaytahay lacagta bixinteeda ayaad yarayn kartaa waana ay kuu fududaan si aad lacag u deynsato.

Deyn-qaadashadaadu hadii ay xuntahay taasi waxa ay noqon kartaa dhibaato wayn. Waxay badanaa ka timaadaa biil bixinta daahsan ama deynta badan ee aad qaadato. Mecnaheedu waxay tahay laga yaa baa in ay ku gu adkaato helitaanka deynta gaariga, kaarka deyn-qaadashada, meel aad dagtid, iyo marmarka qaarkood, shaqo.

WAA MAXAY KAARKA DEYN-QAADASHADA?



Waxbaad ku iibsan kartaa kaarka deyn-qaadashada tartiib ayaanad lacagta u bixinkartaa muda dhexdeeda. Laakiinse waxaad xasuusataa in waxaad ku iibsatid deyn-qaadashadu ay tahay deyn. Waa in aad lacagta soo celisaa. Waxaana raacsan lacagta aad wax ku iibsatay (ribo) iyo marmarka qaarkood ujro aad bixinayso sanad walba.

SIDEEN U DOORTAA KAARKA DEYN-QAADASHADA

Marka aad dooranayso kaarka deyn-qaadashada, waxyaaba kala duwan ayaa jira, iyo kaarar kala duwan ood ka dooran karto. Kuwan ayaa ugu muhiimsan in aad fahamtid, ama aad su'aalo ka qabtid, markaad dooranayso kaarka deyn-qaadashada.

***Xadka deyn-qaadashada*:** Waa qiimaha ugu badan ee shirkada kaarka deyn-qaadashadu ay u ogoshahay qofka kaarka leh in uu kaarkiisa ku deynsado.

***Qiyaasta*:** Qiyaasta kaarka deyn-qaadashadu waxa ay ku tusaysaa inta ay kugu leedahay shirkada kaarka deyn-qaadashadu.

***UJro*:** Badanaa deynleyaashu waxay kugu ganaaxaan ujro hadii aad la daahdid deynta bixinteeda. Ujradaha kale waxaa lagu saarayaa hadii aad lacag kala soo baxdid kaarka ama aad xadka kaarka aad dhaaftid. Kaararka qaarkood ujro go'an ayey leeyihiin bil waliba, hadii aad isticmaashid kaarka iyo hadii kaleba.Ujradu lagayaabaa in lasoo diro bilwaliba ama mar kaliya, waxay noqonkartaa lagabilaabo-$6 ilaa $150. Ujradu waxbay ka dhimaysa inta laguu ogolyahay. Tusaalo ahaan hadii xadka kaarka uu yahay $250 ujraduna thay $150 markaa waxa kuu soo haraya $100 wax deyn-qaadasho ah.

***Ribo*:** Si aad u celisid deynta qofka deynsaday waa in uu bixiyaa ribo, taas oo ay raacsantahay deyntu(qiimaha lacagta lagugu leeyahay). Ribadu wa in qiimaheedu tahay boqolkiiba in gaar ah sanad walba. Hadii ay ribadu tahay 10% sanadkiiba, ood amaahatay $100 ilaa iyo sanad, waa in aad soo celisaa $100 iyo $10 oo ribo ah.

***APR (Boqolkiiba inta aad ribo sanadwalba bixinaysid)*:** Boqolkiiba inta aad ribo sanadwalba bixinaysid (caadiyan la yiraa APR) waa inta aad ribo bixindoontid sanad walba. Caadiyan APR hadii uu hooseeyo waa wax kuu wanaagsan. Waxaad iska hubisaa qoraalka yar si aad u ogaatid in uu bandhigani wali jiro ama uu wakhti go'an leeyahay. APR ka aad leedahay wuu kici karaa hadii wakhtigii bandhigu uu dhacsan yahay.

***Mudada ixsaanka*:** Mudada ixsaanka waa inta maalmood ee laguu ugolyahay in aad ku bixisid deyntaada ayadoo lagu ganaaxeyn.

BIXINTA UGU YAR & RIBADA ISKUDARSAN

Bixinta ugu yar ee kaarka deyn-qaadashada waxaa lagu xisaabiyey bogolleeyga deynta laguguleeyahay oo dhan. Ribada isku darsan waa ribada la xisaabiyey marka la isku daro ribada deynta iyo ribada saarantay ribada deynta. Tusaala ahaan waxaad ka soo qaadaa in kaaarka deyn-qaadashadaada lagu leeyahay $500 oo ribaduna tahay 15%. Hadii aad bixiso bixinta ugu yar oo ah $15 bill waliba, waxa ay kugu qaadan 44 bilood si aad u bixisid $500 waxaanad bixin doontaa $150.87 oo ah ribo. Bixinta ugu yar way dhamayn kartaa deynta laakiinse ribada isku darsan ayaa wakhtiga aad ku bixini doontid dheereynaysa.

WAA MAXAY DHIBCAHA DEYN-QAADASHADU?

Dhibcaha deyn-qaadashadu waa lamber caawinaya deynleyaasha oo ogaysiindoona hadii aad biilkaaga wakhtigiisa aad bixin doontid. Dhibic waliba waxa ay ku xirantahay macluumaadka ku qoran warbixinta deyn-qaadashadaada. Dhibcaha deyn-qaadashadaadu waxay wax yeelikartaa qiimaha ribada aad ka bixin doonto kaarka deyn-qaadashada, deynta gaariga, deynta guriga iyo wixii kale oo deyn ah. Siday u badan yihiin dhibcaha deyn-qaadashadu, dhibicdu marka ay sarayso mecnaheedu waxay u badan tahay waa laguu ogolaani deynta waxaanad ka bixin doontaa deynta cusub ribo qiimaheedu badnayn.

Deynlayaashu badanaa dhibicdaada ayay eegaan. Waxa ay eegaan dhibicdaada marka ay go'an ka gaari rabaan hadii ay qiimaha ribada kaa badalayaan ama xadka uu leeyahay kaarka deyn-qaadashada, ama hadii ay bandhig kuugu soo dirayaan boostada. Marka aad leedahay deyn-qaadasho wanaagsan wax wal ba ayaa kuu fududaanaya marka ay noqoto xaga maaliyada wayna kuu kaantoobaysaa lacagtu xaga ribada.

SIDEED U HAGAAJISAA DHIBCAHA DEYN-QAADASHADAADA

Biilkaaga wakhtigiisa ku bixi. Hadii biilkaaga bixintiisa ka daahdid, waxaad bixin loo diro kuwa uruuriya lacagaha, ama aad sheegatid kicid, waxaasi si wacnayn ayuu uga soo baxayaa dhibcaha deyn-qaadashadaada.

Hoos u dhig deyntaada. Marka la qiimaynayo dhibcahaaga waxa ay isku eegaan lacagta lagugu leeyahay iyo xadkaaga. Hadii lacagta lagugu leeyahay iyo xadkaagu ay isku dhow yihiin taasi dhibaato ayay u keenaysaa